Oregon Health Authority
QAYBTA CAAFIMAADKA

Su’aalaha Inta Badan La Iska Weydiiyo (FAQs) Ku Xirashada Maaskarada Gudaha iyo Bannaanka

(La cusboonaysiiyey 09-02-2021)

Hoos waxaa ku yaala jawaabaha Su’aalaha Inta Badan La Isweediiyo (FAQ) ee ku saabsan Sharciga Maamulka Oregon (OAR) 333-019-1025, Shuruudaha Ku Xirashada Maaskarada ee Goobaha Gudaha iyo Bannaanka.

S: Miyuu sharciga maaskarada keliya khuseeyaa meelaha bannaan ee dadweynaha ama goob shaqo oo gaar loo leeyahay sida warshad wax soo-saarta looga baahanyahay inay u hogaansanto, xitaa haddii aanu u oggolaan xubnaha dadweynaha inay meel bannaan galaan?

J: Marka loo eego sharciga, Meelaha bannaan oo gudaha ah waxay isugu jiraan goobaha shaqada dadweynaha iyo kuwa gaarka loo leeyahay, kuwaas oo ay ku jiraan warshadaha soo-saara cuntada iyo xaruumaha wax sameynta. Shaqsiyaadka waxaa laga rabaa inay xirtaan maaskaro ama weji daboolaha goobaha shaqada ee goobaha shaqada ee gaarka loo leeyahay ee gudaha illaa ay joogaan goobta shaqada shaqsiga ee gaarka ah. Goobta shaqada shaqsiga gaarka ah waa meel gudo ah oo ku taala goob shaqo oo guud ama gaar ah oo uu u isticmaalo shaqada hal shaqsi waqtigiiba taasi oo dhinacyada gidaaro ka xigaan, hoosta sagxaddu ka xigto, xagga sare saqafku ka xigo oo albaabkuna u xiran yahay.

S: Miyuu sharciga maaskarada gudaha khuseeyaa cayaaraha gudaha ee carruurta?

J: Tababarashada iyo ciyaarida cayaarta tartanka gudaha waa ka reeban tahay sharciga oo waji dabooladana looma baahna. Hawl wadeennada cayaaraha, si kastaba ha ahaatee, waxay u baahnaan karaan maaskaro ama dabool weji oo qayb ka ah siyaasadda urur.

S: Miyuu sharciga Maaskarada gudaha khuseeyaa barnaamijyada dhalanyarada?

J: Haa.

S: Ma loo tixgelin karaa hoggaamiyaha diimeed ee la hadlaya dhagaystayaasha diimeed inuu yahay qof khudbad u jeedinaya dhagaystayaasha sidaas darteedna ka reeban sharciga?

J: Haa, hoggaamiyaha diimeed wuu ka reebnaan doonaa si la mid ah qof kastoo kale oo la hadlaya dhagaystayaasha. Ka dhaafitaanka wuxuu keliya khuseeyaa,si kastaba ha ahaatee, goorta uu af-haayeenku u gudbinaayo khudbada dhagaystayaasha.

S: Haddii ganacsigeygu ama hay'addaydu aysan doonayn inay u oggolaato shakhsiyaadka inay xirtaan difaacaha wajiga, miyaa la ii oggol yahay inaan u baahdo oo keliya maaskaro waji daboolada?

J: Haa. Haddii uu ganacsigaaga ama hay'addaada ay doortaan inay lahaadaan shuruudo ka adag xrreka gobolka, OHA waxay kugula talinaysaa inaad dhejiso calaamad leh shuruudahaas adag.

S: Maxaa loo tixgeliyaa "cayaarta tartanka leh"? miyaa la ciyaarida kubbada kollayga saaxiibabadiis ee xarunta jirdhiska loo qaadan karaa cayaar tartan leh?

J: Cayaarta tartanka waa mida guud ahaan loo ciyaaro qayb ka mid ah koox ama horyaal, oo leh dhaqano iyo ciyaaro la qorsheeyay, badiyaa iyada oo loo marayo dugsi, horyaal madadaalo, ama naadi isboorti.

S: Ku jimicsiga xarun jirdhis/jimicsi ma loo tixgeliyaa sameynta cayaar tartan leh sidaas darteedna ma ka reeban yihiin sharciga maaskarada gudaha? Tusaale ahaan, qaadista biraha iyo orodka waa tartan isboorti kuwaasna waxaa lagu ciyaaraa xarunta jirdhiska.

J: Maya. Ku ciyaarida xarunta jirdhiska looma tixgeliyo cayaar tartan leh oo xarumaha jirdhis/jimicsi kama reebno sharciga maaskarada gudaha.

S: Qoob-ka-cayaarka lagu sameeyo xarun qoob-ka-cayaar ma loo tixgeliyaa cayaar tartan leh sidaas darteedna way ka reeban tahay shuruudda maaskarada gudaha?

J: Maya.

S: Daawadeyaasha cayaaraha isboortiga ee gudaha ma looga baahan yahay inay xirtaan weji daboolo?

J: Haa.

S: Haddii gobolkeyga leeyahay shuruud ka adag oo maaskaro ah marka loo eego dowladda, ma inaan raaco baa shuruudaha gobolka?

J: Haa. Waxaa lagaaga baahan yahay inaad raacdo shuruudaha adag.

S: Haddii qof kasta oo ka mid ah shirkadayda la tallaalo oo uu muujin karo caddaynta tallaalka, ma tagi karnaa bilaa waji dabool gudaha?

J: Maya. Sharciga maaskarada gudaha kama reebno dadka tallaalan.

S: Haddii ganacsigaygu uusan marnaba u oggolaan xubnaha dadweynaha inay galaan dhismaha oo dhammaan shaqaalaha la tallaalo, ma waxaan ku khasbannahay inaan gudaha ku xirano maaskaro ama waji dabool?

J: Haa. Sharciga maaskarada gudaha kama reebno dadka tallaalan ama ganacsiyada/ururada aan u furaneyn dadweynaha.

S: Miyey Dadka ama meheradaha lagu ciqaabi karaa dawladda ahaan iyo gobol ahaan markay ku xadgudbaan shuruudaha maaskarada ee labada xukunba?

J: Haa.

S: Shaqsi, sida macmiil, iyo qof mas'uul ka ah goob bannaan oo gudaha ah labaduba ma la ganaaxi karaa sida ku cad sharciga?

J: Haa.

S: Haddii qof ama ganacsi uu ku xadgudbayaan sharciga dowladda, halkee baan ku war geliyaa xadgudubkaan?

J: Cabashooyinka jebinta sharciga waa in loo gudbiyaa Maamulka Badqabka Shaqada iyo Caafimaadka ee Oregon (OR-OSHA) iyadoo la booqanayo https://osha.oregon.gov/workers/Pages/index.aspx.

S: Ma waxaa jira ka-dhaafitaanka sharcigan xirashada maaskarada oo loogu talagalay cunto kariyeyaasha iyo shaqaalaha kale ee maqaayadda kuwaasoo ka shaqeeya guriga gadaashiisa? Gaar ahaan kuleelka xagaygaan, malaga dhaafi karaa haddii la tallaalo oo ay u jiraan meel ka fog lix cag?

J: Maya. ma jiraan wax ka dhaafitaan ah ee dhacdooyinkan. OHA waxay si xoog leh ugu dhiirri gelinaysaa loo-shaqeeyayaashu inay shaqaalaha siiyaan nasashooyin joogto ah si ay dibedda u aadaan oo ay u qaataan nasashooyinka maaskaro oo joogto ah. Booqo OR-OSHA's wesaydhka cadaadiska kuleylka sharcuyada la xiriira soo-gaarista cadaadiska kuleylka iyo jirada iyo macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ka-hortagga cadaadiska kuleylka.

S: Maxaan sameeyaa haddii qof macmiil noqon kara ama booqde yimaado bilaa maaskaro, bilaa gaashaanka wajiga, ama waji daboolka gudaha meel aan mas'uul ka ahay?

J: Waa inaad bixisaa maaskaro, waji daboole ama difaaca wajiga iyo oo aad samaysaa dadaal macquul ah si aad macaamilka ama booqdaha si uu u raaco. Shaqsiyaadka ka mas'uulka ah meelaha bannaan ee gudaha ah ayaa laga yaabaa inay siiyaan waji xirka ama waji daboolka macaamiisha ama booqdayaasha aan lahayn mid.

S: Maxaan sameeyaa haddii macmiil ama booqde yimaado maaskaro, gaashaan waji, ama waji dabool la'aan uuna sheegto in naafanimadiisa ka horjoogsanayso xirashada maaskaro, gaashaanka wajiga, ama waji daboolka?

J: Haddii qof naafo ah uusan xiran karin maaskaro, gaashaanka wajiga ama waji daboolaha, meeshii qofka looga baahan yahay, goob lagu soo dhaweeyo dadweynaha, sida meel ganacsi ama meel u furan dadweynaha, waxaa loo baahan doonaa in lala shaqeeyo qofkaas si loo bixiyo isbeddel macquul ah. Qaar kamid ah guryaha macquulka ah ee caadiga ah waa mid bilaash loogu qaado alaabta, in bilaash gurigiisa loogu geeyo alaabta ama in lagula ballamo in taleefan ama maqal iyo muuqaal looga adeego.

S: Ma waxaa jira ka dhaafitaano quseeya shuruudaha ah inay xirtaan maaskarada, waji daboolka ama gaashaanka wajiga shaqaalaha yiraahdo ma xiran karno mid?

J: Haddii shaqaale uusan u xiran karin maaskaro, waji dabool ama gaashaan waji naafanimo darteed, loo shaqeeyaha waa inuu kala shaqeeyaa shaqaalaha si loo go'aamiyo in tixgselin macquul ah la siin karo. Loo shaqeeyaha waa inuu kala shaqeeyaa waaxdiisa ee ilaha shaqaalaha ama kala hadlaa la-taliyaha sharciyeed si loo go'aamiyo ikhtiyaaradooda sharciyeed ee wax looga qabanayo arrintan. Loo shaqeeyayaashu waxay sidoo kale kala xiriiri karaan Xafiiska Shaqaalaha iyo Warshadaha (BOLI) wixii caawimaad farsamo ah.

S: Miyaa maaskarada-wajiga ee bacda ah oo uu cunto kariyaha gashado oo mararka qaar loo yaqaan "mingle mask" oo daboolaya meelaha garka iyo afka loo oggol yahay maaskaro, dabool waji ama gaashaan waji ahaan?

J: Maya. gaashaanka wajiga waa inuu daboolaa xagga sare ee wajiga, ilaa iyo garka hoostii, iyo ku wareegsadaa dhinacyada wajiga.

S: Ma inaan xirtaa maaskaro, waji dabool ama gaashaan waji marka aan helayo adeegyada gobolka ama galayo dhismeyaasha gobolka?

J: Haa.

S: Miyuu sharciga maaskarada gudaha khuseeyaa goobaha daryeelka carruurta?

J: Haa. Macluumaad dheeraad ah ku saabsan goobaha daryeelka carruurta wuxuu ku yaalaa barta intarneetka Qeybta Waxbarashada Hore.

S: Sharciga maaskarada gudaha ma khuseeyaa machadyada tacliinta sare (kulliyadaha iyo jaamacadaha)?

J: Haa. Booqo Guddiga Xiriirinta Waxbarashada Sare barta intarneetka ee COVID-19 si aad u hesho hagis loogu tala galay macaahidda waxbarashada sare.

S: Sharciga maaskaro gudaha ma khuseeyaa dhismayaasha dabaqyada ah?

J: Haa. Dadka waa inay xirtaan maaskaro, waji dabool ama gaashaan waji markii ay joogaan meelaha caamka ah ee dhismayaasha guryaha ah, sida meelaha soo dhawaynta, daaradaha, wiishashka iyo qolalka dharka lagu dhaqo. Meelahan waxa loo arkaa meelaha gudaha. Dadka looga ma baahna inay xirtaan maaskaro, waji dabool ama gaashaan waji markii ay ku sugan yihiin gudaha guryahooda.

S: Waa maxay caqabadaha dadka naafada ahi ay la kulmi karaan marka dadka kale ay xirtaan maaskarooyin, gaashaanka wajiga ama waji daboolada?

J: Caqabadaha dadka naafada ahi ay la kulmi karaan waa:

- Dadka qaar waxay u baahan yihiin inay arkaan dhaqdhaqaaqa afka ama wajiga si ay u fahmaan waxa aad sheegeyso.
- Dadka qaar ee naafada korriinka ama kala duwanaanshaha qaba ayaa si xun u fahmi kara ama si khaldan u fasiran kara baaqyada wajiga. Qofka ayaa laga

yaabaa inuu ku dhibtoodo ka fahamka shucuurta ee dhawaaqa codka keligiis. Haddii aad xiran tahay maaskaro, waxay ka heli karaan tilmaamo indhahaaga ama baalasha-indhahaaga, taasoo horseedi karta fasiraad khaldan ama si khaldan u fahmida shucuurta/dareenka ama ujeedada hadalka.

- Dadka dhegaha culus qaarkood ayaa akhriya bishimaha. Dhaqdhaqyada afka iyo baaqyada wajiga ayaa gudbin kara macluumaad badan oo maaskarooyinka aan wax laga arkaynin waxay dadka ka horjoogsadaan inay arkaan afka qofka hadlaya.
- Faro-ku-hadalka waxaa loo adeegsadaa afka si uu u gudbiyo ereyada qaarkood iyo macnaha. Markuu waji daboolaha xannibo/qariyo qofka afkiisa, waxaa ku adkaanaya dadka isticmaala faro-ku-hadalka inay wada-hadlaan.

Looshaqeeyayaasha iyo goobaha soo dhaweeya dadweynaha waa inay la shaqeeyaan dadka naafada ah si ay ugu qabanqaabiyaan texgelin macquul ah oo u oggolaanaya shaqaale inuu qabto shaqadiisa ama u oggolaanaya horjooge inuu helo adeegyada. Dadka loo diiday qabatim macquul ah waa inay kala xiriiran Xafiiska Shaqaalaha iyo Warshadaha (BOLI) Qeybta Xuquuqda Madaniga lambarka 971-673-0764 ama crdemail@boli.state.or.us.

S: Ma waxaa jira qof ay tahay inuusan xiran maaskarada wajiga, gaashaanka wajiga ama waji daboolaha?

J: Haa. Dadka soo socda loogama baahno inay xirtaan maaskarada, waji daboolka ama gaashaanka wajiga:

- Caruurta da'doodu ka yartahay labo (2) sano.
- Qof kasta oo aan si amaan leh u xiran karin maaskaro, waji dabool ama gaashaan waji sababtuna tahay naafanimo ama xaalad caafimaad, oo markaa tii ay tahayba waa in tixgelin la codsadaa.
- Qof kasta oo dhibaato ku qabo neefsashada, uusan miyir qabin, ama aan awoodin inuu xirto waji daboolaha, iska bixin karin ama iska siibi karin iyadoon la caawin.
- Qof kastoo hurda.

S: Miyey maaskarooyinka leh khananka soo neefsigu yihiin qaar la aqbali karo in laga dhigto dabool waji?

J: Maya. Maskarooyinka leh daloolada laga neefsado waxaa loogu talagalay inay fududeeyaan neefsashada oo ay ka hortagaan ururka qoyaanka. Iyadoo ay ku xirantahay nooca maaskarada iyo le ekaanshaha maaskarada, maaskarooyinkan waxay ka ilaalin karaan qofka qabaa inuu neefqaato gobo'da iyo firirka. Laakiinse, maskarooyinkan badan kood ma safeeyaan hawada la qaato ama firirka iyo gobo'da xooggan iyadoo sababtuna tahay daloolada laga neefsado oo ku xirneyn sifeeye. Maaskarooyinkan ma ahan kuwo la aqbali karo inay ka hortagaan gudbinta fayraska.

S: Miyay tahay amaan in la xirnaado maaskarada ama waji daboolka muddooyin dhaadheer?

J: Haa. Xirashada maaskarada muddo-dheer waa wax caadi ka ah shaqooyin badan, si loo ilaaliyo shaqaalaha. Tusaalooyinka qaarkood waxaa ka mid ah shaqaalaha daryeelka caafimaadka (tusaale ahaan, marka la samaynayo qalliin-caafimaad oo dheer), dhismaha (tusaale ahaan, kahortaga boorka iyo walxaha kale) iyo shaqaalaha bay'ada/deegaanka (tus. xallinta caaryada). Waji daboolka ee caadi ahaan ay xirtaan dadka caadiga ah muddada COVID-19 waa ka giigsani yar yahay ka ay xirtaan shaqaalaha daryeelka caafimaadka, dhismaha iyo bay'ada, markaa xitaa way ka yar tahay inay joojiyaan socodka hawada ee qaab keeni kara dhibaatooyin caafimaad. Dadka qaba dhibaatooyin xagga neefsiga ah waxay dhibaatooyin ku qabi karaan xirashada waji daboolka. Qof kasta oo aan si amaan leh u xiran karin maaskaro, waji dabool ama gaashaan waji sababtuna tahay naafanimo ama xaalad caafimaad waa inuu codsadaa hoy.

S: Miyey tahay inaan xirto maaskaro ama waji dabool haddii aan ku jiro qolkayga shaqada oo ayna cid kale qolka ila wadaagin?

J: Haa. Shakhsigu waa inuu xirtaa maaskaro, daboolka wejiga ama gaashaanka wejiga marka uusan goobta ahayn goob shaqo oo gaar loo leeyahay. Goobta shaqada shaqsiga gaarka ah waa meel gudo ah oo ku taala goob shaqo oo guud ama gaar ah oo uu u isticmaalo shaqada hal shaqsi waqtigiiba taasi oo dhinacyada gidaaro ka xigaan, hoosta sagxaddu ka xigto, xagga sare saqafku ka xigo oo albaabkuna u xiran yahay.

S: Miyey tahay inaan xirto waji dabool markii aan ku suganahay gurigayga?

J: Maya. Dadka loogama baahna inay xirtaan dabool waji markii ay ku sugan yihiin guryahooga.

S: Ma jiraan waqtiyo ay OHA igula talineyso inaan xirto wejiga dabool markaan bannaanka joogo?

J: Haa. OHA waxay ku talinaysaa in marka meelaha dadku ku badan yahay ama isu imaatinnada waaweyn, shakhsiyaadka aan la tallaalin, aan la tallaal loo ballan qaadin, kuwaas oo halis ugu jira cudurka COVID-19 ee daran, ama la nool qof ka mid ah qeybahaan sii wadaan inay xirtaan maaskaro ama wejiga daboolida oo ay ilaaliyaan fogeynta jirka oo ah ugu yaraan lix (6) fuudh meel ka fog shaqsiyaadka kale. Meelaha dadka badan iyo isu imaatinnada ballaaran ee shakhsiyaadka waxaa ka mid ah laakiin aan ku xaddidnayn munaasabadaha, aagagga munaasabadaha, munaasabadaha isboortiga, carwooyinka, ciidaha, bandhigyada, xafladaha qalin-jabinta ama soo dhaweynta arooska. Waxaad ka heli kartaa talooyinka OHA ee xirashada maaskarada iyo daboolida wejiga marka aad joogto bannaanka halkaan.

S: Miyay kooxaha ka heesa goobaha diimeed ama noocyada kale ee ururada loo tixgeliyaa inay yihiin bandhigeyaal sidaa darteedna ka reeban shardiga xirashada afxirka ee gudaha?

J: Iyadoo ugu wacan tahay halista noocyadan bandhigyada ah, OHA waxay si xoogan ugu talinaysaa bandhigeyaasha inay xirtaan afxir ama weji dabool marka ay

heesayaan, dhowraan kala fogaanshaha jireed sida ugu badan ee suurtogalka ah oo texgeliyaan adeegsiga cod-baahiyeyaal ama qalabyada kale ee kor u qaada dhawaaqa si loo yareeyo baahida loo qabo bandhigeyaasha inay codkooda kor u qaadaan si loo kordhiyo mugga codka. Heesida kooxda waxaa lala xiriiriyay faafida xad-dhaafka ah ee COVID-19, maxaa yeelay heesida xoogan waxay aad ugu dhowdahay inay sababto ka soo saarida dhuunta gobo'yo faafi kara oo ka soo baxa dhuunta. Maadaama si weyn u kordhayaan kiisaska nooca Afaraad ee cudurka, waxaa jira fursad aad u badan oo ay gobo'yadaan faafi kara ugu sii baahin karaan COVID-19 bulshada dhexdeeda. Si kastaba ha noqotee, hawshan waxaa loo tixgeliyaa bandhig sidaas darteedna kuma qasbana shardiga xirashada afxirka ee gudaha.

S: Maxay ka dhigan tahay in la sameeyo dadaal macquul ah si loo hubiyo in macaamiisha, booqdayaasha, iwm, ay xiran yihiin waji dabool?

J: Waqti xaadirkan, Oregon OSHA iyo OHA waxay tixgeliyaan dadaal macquul ah oo ay ku jiraan dhajinta boorarka loo baahanyahay, iyada oo la hubinayo in dhammaan shaqaaluhu iyo tabarucayaasha ay xiran yihiin waji daboolada loo baahanyahay, iyo *inaysan* soo bandhigin boorar walba ama qaadista tallaabo walba ee hoos u dhigaysa shuruudda lagu xiranayo waji daboolashada ama ka niyad-jabineysid macaamiisha iyo danwadaagta inay fuliyaan shuruudda.

Helitaanka dukumiintiga: Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale oo dadban sida fasiraadaha, daabicida farta waaweyn, ama farta indhoolayaasha. La xiriir Xarunta Warbixinta Caafimaadka ee 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsoha.state.or.us.